

## **Ma Xiisaynaya Wareegga 1aad ee P-EBT (Maarso illaa Maajo 2020)?**

*Shuruuddaha xaq u yeelashada ee loogu talagalay Wareeg kasta oo P-EBT ayaa kala duwan.*

Caruurta ayaa u qalmaya manfacyada P-EBT ee Wareegga 1aad haddii:

- Iskuulkoodii oo la xiray cudurka karoonaafayrus darteed (COVID 19); iyo
- Waxay xaq u leeyihiin in ay dugsiga ka helaan cunto bilaash ah ama qiimaheedu la dhimmay

Manfacyada Wareegga 1aad ee P-EBT waxaa loo diray kuwa qaata manfacyada SNAP xagaagii la soo dhaafay oo loogu shubay kaararkooda EBT ga.

Carruurta u qalantay P-EBT, laakiin aan si joogto ah u qaadanayn kaararka manfacyada SNAP, kaararka P-EBT waxaa loogu diray guryahooda ka dib markii waalidku codsaday manfacyada, ama dugsiga uu ilmuhu markii ugu dambaysay uu dhiganayay ka soo qaado.

Kaararka aan laga laga qaadin dugsiga ilmaha dhigto DHS ayaa dib loogu celinayaa.

Haddii aad rumeysan tahay in ubadkaaga uu u qalmo Wareegga 1aad ee P-EBT, laakiin aaddan helin kaarka P-EBT, weli waxaa dhici karta in aad awooddo in aad tallaabo qaado oo aad rafcaan soo dirsado. Wac (833) 496-0661 si aad xog dheeraad ah uga ogaato, ama aad u hesho Khadka Tooska ah ee Barta Rafcaanka: <https://appealonline.dhs.tn.gov/Home/Login>.